



Geedkii hadhwanaag





Geedkii hadhwanaag

Buugga 12^{aad}

Fasalka 2^{aad}




Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Wuxaana isla diyaariiyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Wuxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



Faadumo waa ardayad
dhigata dugsi ku yaala
tuulo ka mid ah
deegaankeena. waxayna
ka mid ahayd ardayda
ugu xariifsan fasalka.




Hadaba maalin maalmaha
kamida ayaa wuxuu
macalinkoodu udhigay
cashir ku saabsanaa
fa'iidada ay leedahay
dhirtu wuxuuna kula
taliyey in arday kasta
uu beero geed.



Hadaba faadumo oo
ahayd gabadh wanaagsan
ayaa waxay go,aansatay
inay geed beerto kuna
beerto dugsiga dhexdiisa
si ay ardayda dugsigu u
hadhsadaan quruxna ugu
noqoto dugsiga waxayna
beertay geedkii.



Mudo yar kadib waxaa
baxay geedkii ay
faadumo beertay oo
caleemihii soo daayey.
Waxaana arintaas soo
dhaweeeyay maamulka
dugsiga iyo waalidiintaba.



Waxaana faadumo lagu
abaal mariyay geedkii
ay beertay. Waxaana
geedkaas loo bixiyay
hadhwanaag, waxayna
noqotay hormuudkii ardayda
dugsiga dhiganaysay.



Kadib markii Faadumo la
gudoonsiiyay abaalmarintii
la siiyay ayaa waxay
tidhi”aad ayaan u
faraxsanahay maanta
maadaama geedkii aan
beeray laygu abaalmariyay.



Kadib iyadoo la hadlaysa
ardaydii ay dugsiga
isla dhiganayeen waxay
faadumo tidhi "hadii
aan geedo ku beerno
dugsiga iyo guryaheenaba
deegaanku wuxuu
noqonayaa mid qurux
badan oo nadiif ah.

